**Waaxda Caafimaadka Shaybaarka ee Vermont**
**Halka ay dagantahay: 359 South Park Drive, Colchester, VT 05446**
**Boostada: PO Box 1125, Burlington, VT 05402-1125**
**(802) 338-4724 (800) 660-9997 (gobolka dhexdiisa kaliya)**

# Baaritaanka Bakteeriyada

**Tilmaamaha qaadista iyo Cabaynta Muunadaha Biyaha la Cabo**
**Qalabka A, AA, AND NU (for coliform/E. coli bacteria)**

**Fadlan si feejigan u akhri tilmaamahan ka hor inta aanad qaadin muunadaada.**

## Agabka waa in ay ku jiraan:

- Dhalo calaamad leh oo nadiif ah oo 100-militir ah taasoo ay ku jirto maadada wax kaydisa ee sodium thisosulfate. Agabka waxaa lagu kaydin karaa heerkulka caadiga ah ilaa looga baahanayo.
- Hal **"Foomka Macluumaadka Qaadista Muunadda Biyaha ah"** (Chem 202)
- Hal weel leh daboolka kartoon ah oo wata calaamada boostada
- Hal **"Hagitaanada oo loogu tala galay Boosto ku dirida iyo Soo rarista Agabka Bakteeriyada Biyaha"** (Maamul 978). Qaad muunada subaxda aad qorshaynayso soo gudbinta muunada si aad wakhti u siiso wakhtiga qaadisda iyo ku diyaarinta shaybaarka. **Baaritaanka Shaybaarka waxaa <u>waajib ah</u> in uu ku bilowdo 30 saacadood laga bilaabo wakhtiga qaadista ama waa la diidi doonaa.**

Fadlan ogsoonow wakhtiga dhacitaanka dhalada muunadda lagu qaado, kaasoo ku shaabadaysan calaamada daboolka sare ee weelka kartoonka ah ee boostada lagu soo dirayo iyo daboolka dhalada hoose ee muunad qaadista. **Ha isticmaalin dhalooyinka muunad qaadista ee wakhtigoodu dhacay.** Qalabka iyo waraaqaha wakhtigoodii dhacay waa in lagu soo celiyaa Waaxda Shaybaarka Caafimaadka ee Vermont taasoo si bilaash ah kuugu badalaysa.

**Shaybaarku wuxuu kaliya aqbalayaa muunadaha raaca tilmaamaha xidhmo ku xidhida hoose.**

### Tilmaamaha

## Soo qaad Muunaddaada:

Haddii aad ku qaadayso muunadaha agab hal ka badan, fadlan akhri tilmaamaha agabyada oo dhan ka hor inta aadan muunad qaadin. Baadhitaankan waxa uu baahan yahay guudmar 3-5 daqiiqo ah kahor inta aadan muunadda diyaarin sida hoos lagu tilmaamay. Daawo muuqaalka ku saabsan sida loo qaado muunadaha biyaha la cabbo: http://www.healthvermont.gov/environment/drinking-water.

1. Isticmaal qasabada caadi ahaan loo isticmaalo biyaha cabida gudaha guriga. Isticmaal tuwaal nadiif ah si aad uga saarto afka qasabada ku xidhan. Ka fogow qasabadaha biyaha firdhinaysa ama daadinaysa.
2. Sii daa biyaha qabow ilaa 3-5 daqiiqo ayaga oo si xoogan u soconaya kahor inta aadan soo aruurin muunadda.
   **FIIRO: Marka aad ka qaadayso muunad isku jir ah (hal qabasho) qasabada, sii daa biyaha kuluul muddo 2 daqiiqo ah, ka dibna biyaha qabow muddo 2 daqiiqo ah. Kaddibna aruuri muunadda adiga oo adeegsanaya biyo qabow sida hoos ku muuqata.**
3. **Ku qor magacaaga iyo lambarkaaga teleefoonka dhinaca calaamadda ee dhalada.**
4. Ka fur furka si loo dilaaciyo daboolka warqadda. Haddii daboolku horey u daloolay, wac shaybaarka si ay dhalada kaaga badalaan. **Ha taaban afka dhalada. Ha biyo raacin dhalada, waxaa kujiro maaddo wax kaydisa oo muhiim ah.**

5. Yaree socodka biyaha. Buuxi dhalada adiga oo waxyar ka kormarinaya **laynka 100 ml (mililitar).** Tujaabadu waxay u baahan tahay ugu yaraan 100 ml oo biyo ah. Ha u ogolaan in dhaladu buux dhaafto.
6. Badal furka dhalada. Si adag ugu xir furka si aad uga hortagto in biyuhu ka daataan.
7. Si buuxda u buuxi foomka Macluumaadka Qaadista Muunada Biyaha ah (hoos ka eeg).

## Qaabka loo Buuxiyo Foomka Macluumaadka oo Loo xidho Muunada:

**Muunadaha la soo gudbiyo ayada oo aan wadan macluumaad dhammaystiran ama kala dhimanyahay waa la diidi doonaa ama waxay keeni kartaa dib u dhac ku yimaada warbixinta natiijada baadhitaanka.**

1. Geli magacaaga oo dhammaystiran, ciwaankaaga meesha aad degentahay, iyo iimaylka aad doonayso in laguugu soo diro qaybta sare ee bidixda ah ee foomka Macluumaadka Qaadista Muunada Biyaha.
2. Geli Taariikhda iyo Wakhtiga aad soo qaaday muunada. **Fadlan ogow: <u>Taariikhda iyo wakhtiga soo qaadista muunada</u> si loo baadho muunada**.
3. Qor magaca qof qaadaya muunadda.
4. Geli lambarka teleefoonka maalintii lagaa helo adiga oo ku daraya furaha deegaanka.
5. Geli goobta muunadda laga qaadayo bogoska hoose ee taariikhda, iyo wakhtiga qaadista.
6. Geli faalo kasta oo aad u aragto inay baaritaanka faa'iido u leedahay.
7. ***Mulkiileyaasha guryaha:** Sheeg in biyaha koloriin lagu daray labadii todobaad ee lasoo dhaafay iyo in kale.
   ***Nidaamka Biyaha Dadweynaha oo <u>kaliya</u>**: Fadlan sheeg natiijada goobta ee Koloriinta Haraaga ah. Fiiro: Shaybaarku wuxuu aqbalayaa muunadda biyaha la cabbo, sida uu u codsado qofka qaadayaa, oo ah in lagu baaro Standard Method (Habka Caadiga ah) ee 9223. Muunadda lagama baari doono koloriin ku dhex jirta marka la keeno Waaxda Shaybaarka Caafimaadka ee Vermont.

8. Ku rid dhalada muunada iyo Foomka Macluumaadka Qaadista Muunada la dhammaystiray gudaha weelka calaamada leh. Isku day inaad muunada ka dhigto mid qabow adiga oo ka ilaalinaya falaaraha qorraxda ee tooska ah. **Ha qaboojin.**

9. Dhammaanba muunadaha Agabka A iyo AA waxaa kaliya laga baarayaa bakteeriyada coliform oo ay kujiraan *Escherichia coli*, taasoo calaamad u ah wasakhow saxaro ah. Agabka NU wuxuu bixinayaa tirada bakteeriyada coliform iyo *Escherichia coli* ilaa 200 oo coliform ah ama *Escherichia coli* 100kii ml oo biyo ahba.

## Soo dirista Muunadaada iyo Wakhtiga aad Helayso Natiijooyinka Baaritaankaaga:

1. Muunada waxaa lagu soo diri karaa heerkulka caadiga ah ayada oo kujirta weelka lagu siiyay waxaana lagu soo dirayaa qaabka ugu dhakhsaha badan. **Baaritaanka shaybaarku waa inuu bilowdaa 30 saacadood gudahood marka la qaado muunada ka dib.** Eeg **"Hagitaanada oo loogu tala galay Boostada iyo Soo dirista Qalabka Bakteeriyada Biyaha"** (Maamul 978).
2. Muunadaha waa in la helaa ugu danbayn 4:30 galabnimo maalmaha shaqada ee caadiga ah si baaritaanku u bolowdo isla maalinkaas. Natiijooyinka muunadaha la helay ugu danbayn 4:30 galabnimo waxay diyaar noqonayaan kaddib 3da galabnimo maalinta soo socota.
3. Natiijooyinka muunadaha la helo Jimcaha inta badan diyaar ma noqon doonaan ilaa laga gaarayo Isniinta soo socota.

**Muunadaha waa la diidayaa haddii:**

* Taariikhda iyo wakhtiga muunada la qaaday ay ka maqan yihiin muunada iyo foomka
* Magaca qofka muunada soo qaaday uu ka maqan yahay foomka
* Dhalada muunada lagu soo qaaday wakhtigeedii dhacay (ka eeg taariikhda calaamadda dhalada)
* Mugga muunado ka yaryahay 100 ml.
* Muunada lagu soo qaaday dhalo aan ahayn tii lagu bixiyay Agabka Shaybaarka.
* **Wakhtiga muunadu ka badan yahay 30 saacadood marka uu Shaybaarka soo gaaray.**

Haddii aad qabto wax faalooyin ah ama su’aalo ah oo ku saabsan tilmaamahan, fadlan wac mid ka mid ah lambarada teleefoonada ku qoran qaybta hore ee foomkan. Waad mahadsantahay.